# Guriga wax ku barashada lacala haddii dugsiyada la xiro

## Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha

Haddii ilmahaaga dugsigiisu uu u baahdo in la xiro, dugsigu wuxuu kula xiriiri doonaa qoysaska siyaalahooda caadiga ah (tan waxaa laga yaabaa inay noqoto iimeyl ahaan, SMS, websaytyo).

Haddii dugsiyada la xiro wakhti dheer, dugsigu wuxuu sii wadayaa inuu siiyo nashaadka waxbarashada ilmahaaga si uu guriga ugu sameeyo waxayna kaala soo xiriirayaan waxyaalo ku saabsan waxbarashadooda.

Dugsiyo fara badan oo ah dawlad goboleedka oo dhan ah macalimiintu haddaba waxay ku bixiyaan oo ku maareeyaan nashaadka waxbarashada iyagoo isticmaalaya aalada online ka. Tan waxaa laga yaabaa inay ka mid noqdaan casharada qaar toos u baxaya. Haddii adiga ama dugsigaagu aydaan haysan fursadaha digital ama online ka ah waxay isticmaali doonaan istaraatijiyado aan digital ahayn. Tan waxaa ka mid noqon kara soo dirida waraaqaha shaqada, buugta daabacan ama USB oo ka kooban waraaqo digital ah iyo fiidyowyo gurigaaga iyo ilmahaaga ama iimeyl iyagoo isticmaalaya.

Waxaa sidoo kale laga yaabaa macalimiintu inay ardeyda ula soo xiriiraan si kooxo ah ama wicitaan taleefan oo qof la hadlayo qof qof kale.

Warqada macluumaadku waxay kaa caawineysaa inaad fahamtid sidii aad u caawin lahayd ilmahaagu inuu guriga wax ku barto taas oo ay ku jirto:

- Masuuliyadaada- waxaa jira waxyaalo aad u baahan doonto inaad sameysid si aad u caawisid ilmahaagu inuu guriga wax ku barto sida dejinta waxyaalo joogta ah, helida meel degan iyo weydiintooda sida waxbarashadu u socoto.
- Masuuliyada ilmahaaga – ilmahaagu wuxuu sidoo kale u baahan doonaa inuu raaco waxyaalaha joogtada ah ee loo dejiyey isaga oo dhammeystirayo hawlaha uu macalimku kuu xilsaaro markay sameynayaan shaqadooda ugu fiican.
- Sida loo qorsheeyo maalintooda -dugsigaagu waa inuu ku siiyaa waxoogaa tallo iyo tilmaamo ah waxa ilmahaagu laga rabo inuu sameeyo maalinta inta lagu jiro.
- Inay ilaaliyaan fiyoobaantooda – waxaad u baahan doontaa inaad hubisid inay helaan bririrf, biyo cabbaan oo aysan cidhiidhi dareemin ama walaac.
- Isgaarsiinta -waa muhiim inaad ilmahaaga si joogta ugala hadashid waxbarshadooda. Macalinka ilmahaaga iyo/ama dugsiga ayaa kula soo xiriiri doona oo kuu sheegi doona sidii aad iyaga ula xiriiri lahayd.
- Isticmaalida wakhtiga shaashada iyo tignoolajiyada – waxay noqoneysaa muhiim inaad kormeerto ilmahaaga si uu ugu isticmaalo tignoolajiyada si ammaan leh xadna u samee wakhtiga ay ku qaataan online.

## Adeegga Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada. Adeegani adiga wax lacag ah lagaama qaadi doono.